Waa Maxay VCAL?

Shahaadada Victoria ee Aqoonta La-Dabaqay (VCAL) waa waddo farsamo-gacmeed cusub oo u furan ardayda Sannadka 11aad iyo 12aad.

VCAL waxay ku siinaysaa waayo-aragnimo la xirriirta shaqada oo la taaban karo, iyo sidoo kale xirfadaha barashada akhris-qoraalka iyo xisaabinta iyo fursadda aad ku horumarin karto xirfadaha qof ahaantaada oo muhiimka u ah nolosha iyo shaqada. Ayadoo la mid ah Shahaadada Victoria ee Waxbarashada (VCE) ayey VCAL ayana tahay shahaado la aqoonsan yahay.

Ardayda samaynaysa VCAL waxay mudan yihiin inay galaan tababarka TAFE-ka, inay sameeyaan shaqo-barasho, ama inay helaan shaqo ka-dib marka ay dhameeyaan dugsiga. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad bilowdo VCAL ka-dibna aad go'aansato in VCE-du kugu habboon tahay, waxba kuma jabna inaad is-baddesho. Runtii, cutubyada VCE-da oo aad ku soo qaadato VCAL waxaa laguugu tirinayaa VCE-da, haddii aad go'aansato inaad isku badalato korsooyinka shahaadooyinkaas.

Is-baddellada badan ee VCAL ayaa kuu ogolanaya inaad qaadato barnaamij waxbarasho oo ku habboon waxa aad jeceshahay iyo baahida waxbarashadaada. Qaybaha iyo cutubyada sida buuxda loo aqoonsaday ayaa laga dhex doortaa afartan qaybood ee soo socda:

- Xirfadaha barashada Akhris-qoraalka iyo Xisaabinta
- Xirfadaha U-gaarka ah Farsamooyinka
- Xirfadaha La-Xirriira Shaqada
- Xirfadaha horumarinta Qof ahaaneed

Haddii aad si fiican u dhammaysatay VCAL-kaagii, waxaad helaysaa shahaado iyo caddaynta natiijooyinka kuwaas oo faahfaahinaya maaddooyinka daraasadda aad soo dhammaysay.

Waxaan uga baahanahay inaan ka ogaado

Sababta aan u dooranayo inaan sameeyo VCAL?

VCE-du waa waddada u habboon ardayda jecel inay jaamacadaha ka sii wataan waxbarasho dheeraad ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaad dareemi kartaa inaysan taasi waddo sax ah kuu ahayn adiga.

VCAL waa shaahaado dugsi sare oo la aqoonsan yahay laguna qaato Sannadaha 11aad iyo 12aad. VCAL waxay ku salaysan tahay wax-barasho farsamo, oo loo yaqaan "wax-barashada la-dabaqay".

Haddii aad doorato inaad samayso VCAL, waxaad helaysaa waayo-aragnimo la-taaban karo iyo xirfadaha 'shaqo-helidda', iyo sidoo kale xirfadaha aad uga baahan tahay tababar dheeraad ah ee goobta-shaqada ama TAFE-ka.

Goormaan samayn karaa VCAL?

Waxaad ku bilaabi kartaa barnaamijkaaga VCAL Sannadaha 11aad iyo 12aad ee dugsiga sare. VCAL waxaa kalo laga helaa badiba mac-hadyada TAFE-ka iyo tiro yar ee xaruumaha Waxbarashada Bulshada Dadka Waaweyn (ACE).

Maxay yihiin heerarka VCAL?

VCAL waxay leedahay saddex heer – Heerka Asaasiga, Heerka Dhexe iyo Heerka Sare. Waxaad ka bilaabi kartaa oo dhammayn kartaa VCAL-kaaga heerka ku habboon baahidaada iyo kartidaada.

Ma jiraan wax shuruudo gelitaan ah?

Maya. VCAL waxaad ka bilaabi kartaa heerka ku habboon kartidaada. Barahaaga ama la-taliyahaaga xirfadaha ayaa kaa caawinaya sidaad u go'aansan lahayd heerka kugu habboon.

Immisa ayey igu qaadanaysaa inaan ku dhammeeyo VCAL?

VCAL waxaa loo sameeyey ardayda dhigata Sannadaha 11aad iyo 12aad. Waxaad helaysaa shahaado VCAL iyo caddaynta natiijooyinka markii aad si fiican u dhammayso barnaamijkaaga VCAL ee heerkii aad dooratay.

Maxaad helaysaa markii aad si fiican u dhammayso VCAL?

Haddii aad si fiican u dhammayso barnaamijkaagii VCAL waxaad helaysaa shahaadada VCAL oo ah heerka Asaasiga, Dhexe ama Sare, taasoo ku xiran heerka VCAL ee aad dooratay si aad u dhammayso. Waxaad kaloo helaysaa caddaynta natiijooyinka, taas oo ay ku qoran yihiin dhammaan cutubyadii VCAL-ka, VCE-da iyo VET-ka.

Halkee baan ka baran karaa VCAL?

VCAL waxaa laga bixiyaa dugsiyada, mac-hadyada TAFE-ka iyo qaar ka mid ah xaruumaha Waxbarashada Bulshada Dadka Waaweyn (ACE) ee dowlad-goboleedka oo dhan. Ka eeg www.vqa.gov.au iiska bixiyeyaasha VCAL oo dhan.

Maxaa laygu tirinayaa VCAL-kayga?

Maxay tahay Sahaadada Waxbarashada Mihniga iyo Tababarka ah (VET)?

Barnaamijyada tababarka ee VET waxay fursad siiyaan dugsiyada, machadyada tababarka iyo goobaha waxsoosaarka si wadajir looga shaqeeyo in ardayda loo diyaariyo shaqo-helid iyo tababar dheeraad ah. Badiba dugsiyada sare waxay bixiyaan koorsooyinka Waxbarashada Mihniga iyo Tababarka (VET) kuwaas oo gacan ka gaysta dhammaystirka fiican ee VCAL waxayna bixiyaan aqoonsiga waxabarasho mihnadeed iyo mid tababareed taas oo qaran ahaan la aqoonsan yahay.

Tan ma laygu tirinayaa VCAL-kayga?

Barnaamijyada VET waxay fursad siiyaan dugsiyada, mahadyada tababarka iyo goobaha shaqada inay wadajir uga shaqeeyaan inay ardayda u diyaariyaan shaqo iyo tababar dheeraad ah. Badiba dugsiyada sare waxay bixiyaan koorsooyinka Waxbarashada Mihniga iyo Tababarka ah (VET) kuwaas oo kordhiya si fiican u dhammaystirka shuruudaha VCAL waxayna bixiyaan shahaadooyinka mihniga ah oo qaran ahaan loo aqoonsan yahay.

Haa. Waa inaad kala hadashaa barahaaga ama la-taliyahaaga xirfadaha si aad uga wada-shaqaysaan inta ay tahay daraasadahaagii hore ee laguugu tirin karo VCAL-kaaga iyo sidaad u qorshayn lahaydeen inta ka harsan barnaamijkaaga VCAL.

Waxaan hore u sameeyey maaddooyin VCE ah. Kuwaas ma laygu tirinayaa VCAL-kayga?

Haa, haddii aad haysato natiijada 'S' oo u taagan dhammaystirka fiican ee cutub VCE ah waxaa laguugu tirinayaa VCAL-kaaga. Waa inaad kala hadashaa barahaaga ama la-taliyahaaga xirfadaha sidaad u qorshayn lahaydeen inta ka harsan barnaamijkaaga VCAL.

Ma u baddalan karaa VCE haddii aan is-baddalo?

Haa. Haddii aad is-baddesho oo aad doonaysid inaad u wareegto VCE-da, ama haddii aad doonaysid inaad sii wadato VCE-da ka-dib markii aad dhammayso VCAL, cutub kasta oo VCE ah oo aad si fiican u soo dhammaysay asagoo qayb ka ah VCAL waxaa laguugu tirinayaa VCE-da. Waxaad kaloo yeeli kartaa inaad u wareegsato buundooyinka kareedhitka ah ee cutubyada iyo qaybaha kale oo aad ku soo dhammaysay ayagoo qayb ka ah VCAL-kaaga. Arrintan waa inaad kala hadashaa barahaaga ama la-taliyahaaga xirfadaha hadii aad go'aansato inaad sidaas yeesho.

Ma shaqayn karaa waqti-dhimman ama ma sii wadi karaa shaqo-barashada anoo ku qoran VCAL?

Waxaad ku heli kartaa aqoonsi iyo buundooyin kareedhit ah wixii shaqo-dhimman ah marka aad ku qoran tahay VCAL. Shaqadan waxaa ka mid ah:

- Shaqo-barasho ama tababarid waqti-dhimman ah
- Shaqo waqti-dhimman ah
- Shaqo ku qorid

Sidee baa loo qiimeeyaa VCAL?

VCAL waxay ka kooban tahay koorsooyin ama shahaadooyin la aqoonsan yahay. Qayb kasta oo ka mid ah barnaamijkaaga waxaa loo qiimeeyaa ayadoo la raacayo shuruudaha qiimaynta ee qayb kasta oo barnaamijka ka mid ah.

Ma u baahanahay inaan u fariisto Imtixaanka Wax-qabadka Guud (GAT)?

GAT waa imtixaan qoraal ah oo ardayda lagu imtixaano aqoonta iyo xirfadaha xisaabta, sayniska iyo taknooloojiyada, insaaniyadda iyo saynisyada bulshada iyo farshaxanka. Waxaa sameeya ardayda VCE-da oo dhan kuwaas oo samaynaya cutubyada 3aad iyo 4aad ee VCE-da oo isku xiga. Laga bilaabo 2007, ardayda samaynaysa cubtubyada 3aad iyo 4aad ee VCE VET oo isku xiga kuwaas oo la qiimeeyo waxaa looga baahan doonaa inuu u fariisto imtixaanka GAT. Ardayda kuwa dugsi-ku-qornaantooda keliya ay ka koobnaato cutubyada VCAL loogama baahna inay u fariistaan imtixaanka GAT. Si kastaba ha ahaatee, waxaad dooran kartaa inaad u fariisato imtixaanka GAT haddii ay ku habboon tahay waddadaada aad u marayso waxbarasho dheeraad ah, tababar ama shaqo-helidda.

Maxaan baranayaa?

Ayado ay ku caawinayaan barahaaga iyo la-taliyahaaga xirfadaha, waxaad samayn kartaa barnaamijka VCAL oo ku habboon baahidaada wax-barasho ee gaarka ah iyo xiisahaaga. Waxaad heli kartaa inaad doorato cutubyada iyo qaybaha mid kasta oo ka mid ah afarta qaybood ee soo socda ee qaybaha VCAL-ka khasabka ah:

Qaybta 1aad – Xirfadaha Akhriska iyo qoraalka iyo Xisaabinta

Barnaamijkaaga VCAL waa inay ku jiraan maaddooyinka ahriska iyo qoraalka iyo xisaabinta. Kuwaan waxaa laga dhex dooran karaa cutubyada xirfadaha akhris-qoraalka VCAL iyo xirfadaha xisaabinta ee VCAL iyo Ingiriisiga VCE-da iyo xisaabta ama daraasadaha waxbarashada dheeraadka ah sida Shahaadada Waxbarashada Guud (Dadka-waaweyn) taas oo ah koorso lagu bixiyo mac-hadyada TAFE-ka iyo xaruumaha ACE taas oo horumarisa xirfadaha akhriska iyo qoraalka iyo xisaabinta oo muhiimka u ah waddooyinka loo maro mihnadaha iyo shaqada.

Qaybta 2aad – Xirfadaha farsamooyinka u-gaarka ah

Barnaamijkaaga VCAL waa inay ku jiraan cutubyo u-gaar ah farsamooyinka oo laga soo qaato barnaamijyada Waxbarashada mihniga iyo Tababarka (VET) ah ama VCE VET kuwaas oo ah (oo ah shahaadooyinka Waxbarashada Mihniga iyo Tababarka kuwaas oo loo bixiyo sidii ayagoo qayb ka ah VCE-da). Si kastaba ha ahaatee, lagaama rabo inaad xoogga saarto, ama aad dhammayso, hal shahaado oo VET ah. Tusaale ahaan, waxaad dooran kartaa inaad qaadato qaybaha iyo cutubyada kala duwan ee laga soo qaato shahaadooyinka VET si ay u buuxiso shuruudaha VCAL, loogana helo waayo-aragnimo dhowr qaybaha mihniga ah. Dhowrkaas waddo ee VET-ka waa mid ballaaran waxaana ka mid ah baabuur-barashada, injineerinka, dhisidda iyo dhismaha, soo-dhaweynta iyo ganacsiga, maltimeediyaha, IT, beeraha, hortikaljarka, bakhaaradda iyo tima-qurxinta.

Qaybta 3aad – Xirfadaha Shaqada La-xirriira

Si loo horumariyo xirfadaha ‘shaqo-gelinta’, VCAL waxay ku siinaysaa doorashada aad ku qaadan karto shaqo ku-qorid habaysan ama shaqo-barasho/tababarid waqti-dhimman ah shaqo ama waayo-aragnimo shaqo waqti-dhimman ah. Waxaad kaloo baran kartaa cutubyada iyo qaybaha kuwaas oo kugu caawinaya inay kuu diyariyaan shaqo, tusaale ahaan caafimaadka iyo amniga goobta-shaqada ama xirfadaha waraysiga shaqo-qorista.

Qaybta 4aad – Xirfadaha Horumarinta Qof ahaaneed

Ayadoo qayb ka ah barnaamijkaaga VCAL waxaad ka qayb-galaysaa mashaariica iyo nashaadyada ka socda bulshadaada ama dugsigaaga kuwaas oo kugu caawin doonaa horumarinta xirfadaha wada-shaqaynta-kooxda, isku kalsoonida iyo xirfadaha kale oo muhiimka u ah nolosha iyo shaqada. Tusaale ahaan, dugsigaagu wuxuu la shaqayn karaa guddiga degmada degaankaaga si loo horumariyo dhulalka baarkiyada ah. Wax-barashada aad halkaas ka hesho waxaa laguugu tirin karaa VCAL-kaaga.

Halkee bay VCAL igaarsiin kartaa?

Ma ku heli karaa waxbarashada jaamacadda haddii aan si fiican u dhammaystiro VCAL?

Haddii aad damacsan tahay inaad gasho jaamacad marka aad dugsiga toos uga soo baxdo, VCAL kuma habboona inaad doorato. Ardayda qorshaynaysa inay waxbarashada sare ee jaamcadda toos u galaan waxay sida badan sameeyaan VCE-da taas oo u ogolaanaysa inay buundada ENTER ka helaan Xarunta Ogolaanshaha Jaamacadaha Victoria (VTAC). Haddii aad baranayso VCAL-ka Heerka Sare ah aadna go’aansato inaad jeceshahay inaad jaamacad gasho, ka hubso barahaaga ama la-taliyahaaga xirfadaha sababtoo ah jaamacadaha qaarkood waxay tixgeshaan oo jaamacadda u ogolaadaan ardayda haysata shahaadada VCAL ee Heerka

Sare ah. Si kastaba ha ahaatee, jaamacad gelidda toos marka looga soo baxo dugsiga maahan waddada keliya oo jaamacad lagu helo. Dadka qaarkiis waxay koorsada waxbarashada mihniga iyo tababarka ka qaataan TAFE-ka, taas oo laga yaabo inay ku helaan Diblooma ama Dibloomada Sare, ka-dibna ay go'aansadaan inay faa'ido ugu jirto inay qaataan koorso jaamacadeed. VCAL waxay noqon kartaa meel wax laga bilaabo oo waddada kuu furaysa.

Maxay yihiin waddooyinka ii furan isla markii aan dhammaystiro VCAL?

VCAL waxay ku siinaysaa waayo-aragnimo iyo aqoonsi shahaado oo shaqada la-xirriirta oo la taaban karo kuwaas oo ay aqoonsan yihiin mac-hadyada TAFE-ka iyo loo-shaqeeyeyaashu. Waxaas oo dhan waxay kaa caawinayaan inaad ka wareegto dugsiga oo u wareegto shaqada, shaqo-barasho ama tababarid ama tababar dheeraad ah oo TAFE-ka ah.

Sidaas baddalkeeda, haddii aad ka bilowdo barashada VCAL-kaaga Heerka Asaasiga ah ee Sannadka 11aad oo aad si fiican u dhammayso, waxaad yeeli kartaa markaas inaad dhammaysato Heerka Dhexe ama Heerka Sare ee VCAL-kaaga Sannadka 12aad. Ama waxaad dib uga tashan kartaa waddooyinka kuu furan waxaadna go'aansan kartaa in jaamacaddu tahay doorashada kugu habboon, markaasna waxaad u wareegi kartaa VCE-da.

VCAL ma ii-diyaarin kartaa inaan ku galo mihnad farsamo?

Isla markii aad dhammayso VCAL-kaaga waxaad haysataa buundooyinka kareedhitka ah oo aad ku heli karto shahaado mihnadeed ama farsamo gaar ah waxaadna leedahay aqoonta maaddooyinka Caafimaadka & Amniga Goobta-Shaqada (OH&S). Wax-barashadaas hore waa laguu aqoonsanayaa waxaana laguugu tirinayaa shaqo-barashadaada ama tababarkaaga.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga ogaato VCAL, kala xirriir Hay'adda Victorian Curriculum and Assessment Authority taleefoonka 1800 134 197 ama ka eeg www.vcaa.vic.edu.au